| | |
|---|---|
| 3. Iyo Maalintu markay ifiso. | وَٱلنَّهَارِ إِذَا جَلَّىٰهَا ٣ |
| 4. Iyo Habeenku markuu daboolo (madoobaado). | وَٱلَّيۡلِ إِذَا يَغۡشَىٰهَا ٤ |
| 5. Iyo Samada iyo say u dhisantahay. | وَٱلسَّمَآءِ وَمَا بَنَىٰهَا ٥ |
| 6. Iyo Dhulka iyo suu u fidsanyahay. | وَٱلۡأَرۡضِ وَمَا طَحَىٰهَا ٦ |
| 7. Iyo Nafta iyo sida Eebe u ekeeyay. | وَنَفۡسٖ وَمَا سَوَّىٰهَا ٧ |
| 8. Una tusiyay Jidka xun iyo ka Eebe kayaabiddaba. | فَأَلۡهَمَهَا فُجُورَهَا وَتَقۡوَىٰهَا ٨ |
| 9. Ee waxaa liibaanay Ruxii Naftiisa Daahiriya. | قَدۡ أَفۡلَحَ مَن زَكَّىٰهَا ٩ |
| 10. Waxaana khasaaray Ruuxii Naftiisa xumaan dhex galiya. | وَقَدۡ خَابَ مَن دَسَّىٰهَا ١٠ |
| 11. Thamuud waxay beeniyeen (xaqii) kibir dartiiis. | كَذَّبَتۡ ثَمُودُ بِطَغۡوَىٰهَآ ١١ |
| 12. Marku tagay koodii xumaa (si uu hasha u dilo). | إِذِ ٱنۢبَعَثَ أَشۡقَىٰهَا ١٢ |
| 13. Oo Rasuulkii Eebana ku yidhi, iska daaya Hasha Eebe iyo Cabbideeda. | فَقَالَ لَهُمۡ رَسُولُ ٱللَّهِ نَاقَةَ ٱللَّهِ وَسُقۡيَٰهَا ١٣ |
| 14. Wayna beeniyeen Rasuulkii Hashiina way Dileen markaasaa Eebe si daran u caddibay Dambigooda dartiis. | فَكَذَّبُوهُ فَعَقَرُوهَا فَدَمۡدَمَ عَلَيۡهِمۡ رَبُّهُم بِذَنۢبِهِمۡ فَسَوَّىٰهَا ١٤ |
| 15. Isagoon Eebe ka yaabaynin cidhib (iyo wax yeello). | وَلَا يَخَافُ عُقۡبَٰهَا ١٥ |

Eebe wuxuu ku dhaartay Todobo Arrimood oo Suuraddan ka mid ah, in Ruuxii xaqa ku toosnaada uu liibaani, kii Jidka xun qaadana uu khasaari, isla waynida Dambiga, iyo xaq-diidnimaduna sabab u noqoto Halaag iyo ciqaab.
Rasuulkuna wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee»: «Ruux kasto oo la dhalo waxaa lagu dhalaa Fidrada (Islaamka). waxaa kale oo uu dhihi jiray isagoo sujuudsan: «Eebow sii Naftayda Cabsideeda, Daahirna yeel'adaa u khayr badan ku wax Daahiriyee, Adigaa wali u Ah Sayidkeedana ah». Waxaa wariyay Imaam Axmed. Ash-Shams (1-15).

## Suurat Al-Layl سورة الليل

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Habeenku markuu wax qariyo.

وَٱلَّيۡلِ إِذَا يَغۡشَىٰ ﴿١﴾

2. Iyo markay Maalintu Muuqato (ifto).

وَٱلنَّهَارِ إِذَا تَجَلَّىٰ ﴿٢﴾

3. Iyo Abuuridda Dadka Lab iyo dhaddigba.

وَمَا خَلَقَ ٱلذَّكَرَ وَٱلۡأُنثَىٰٓ ﴿٣﴾

4. In Camalkiinnu (dadow) kala duwanyahay.

إِنَّ سَعۡيَكُمۡ لَشَتَّىٰ ﴿٤﴾

5. Ruuxiise bixiya (xuquuqda) Eebana ka dhawrsada.

فَأَمَّا مَنۡ أَعۡطَىٰ وَٱتَّقَىٰ ﴿٥﴾

6. Rumeeyana tii wanaaga badnayd (ciwal).

وَصَدَّقَ بِٱلۡحُسۡنَىٰ ﴿٦﴾

7. Waxaannu u fududaynaa wanaagga (iyo Jidka fiican).

فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلۡيُسۡرَىٰ ﴿٧﴾

8. Ruuxiise ku bakhayla Xoolaha isna deeqtoonaysiiya «iskibriya».

وَأَمَّا مَنۢ بَخِلَ وَٱسۡتَغۡنَىٰ ﴿٨﴾

9. Beeniyana Tii wanaaga badnayd (ciwal).

وَكَذَّبَ بِٱلۡحُسۡنَىٰ ﴿٩﴾

10. Waxaan u fududaynaa Jidka xun.

فَسَنُيَسِّرُهُۥ لِلۡعُسۡرَىٰ ﴿١٠﴾

11. Xoolihiisuna wax uma taraan markuu halaagsamo.

وَمَا يُغۡنِي عَنۡهُ مَالُهُۥٓ إِذَا تَرَدَّىٰٓ ﴿١١﴾

12. Annagaa wax hanuuninna.

إِنَّ عَلَيۡنَا لَلۡهُدَىٰ ﴿١٢﴾

13. Aakhariyo Addunbana Annagaa iska leh.

وَإِنَّ لَنَا لَلۡأٓخِرَةَ وَٱلۡأُولَىٰ ﴿١٣﴾

14. Waxaana idiinka digaynaa Naar kulayl daran.

فَأَنذَرۡتُكُمۡ نَارٗا تَلَظَّىٰ ﴿١٤﴾

15. Oosan galaynin Ruux xun mooyeen.

لَا يَصۡلَىٰهَآ إِلَّا ٱلۡأَشۡقَى ﴿١٥﴾

16. Oo xaqa beeniyay jeedsadayna.

ٱلَّذِي كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ﴿١٦﴾

17. Waxaana ka fogaada (galidda naarta) Ruuxii Eeba ka dhawrsada.

وَسَيُجَنَّبُهَا ٱلۡأَتۡقَى ﴿١٧﴾

18. Ee bixiya Xoolihiisa si uu u daahirnoqdo.

ٱلَّذِى يُؤْتِى مَالَهُۥ يَتَزَكَّىٰ ﴿١٨﴾

19. Ruux wax ugu nicmeeyayna oo abaalmarinna ma uusanjirin.

وَمَا لِأَحَدٍ عِندَهُۥ مِن نِّعْمَةٍ تُجْزَىٰٓ ﴿١٩﴾

20. Ee Wuxuu u bixin dar Eebaha sarreeya.

إِلَّا ٱبْتِغَآءَ وَجْهِ رَبِّهِ ٱلْأَعْلَىٰ ﴿٢٠﴾

21. Wuuna raalli noqondoonaa Ruuxaasi.

وَلَسَوْفَ يَرْضَىٰ ﴿٢١﴾

**Eebe wuxuu ku dhaartay in camalka Dadku kala duwanyahay, Ruuxii toosana Jidka wanaagsan loo fududayn, kii beeniya oo qalloocdana Jid xun uu qaadi, Aakhariyo Addunna Eebaa iska leh, ee waa in laga digtoonaado xumaanta, wanaagga iyo dar Eebe wax u bixintana lugu dadaalo.**
**Jaabir Bini Cabdiillaahi waxaa Laga wariyay inuu Yidhi: Rasuulkii Eebow ma waxaan u Camal-Falaynaa Amar la Dhammeeyay mise Amar Aannu Cosboonayn? Markaasuu Yidhi: «Amar la Dhammeeyay» markaasuu yidhi Suraaqo: Camalku maxaa weeye marka? Rasuulkii Eebe Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe «ha yeelee» markaas wuxuu yidhi: «Ruuxii Camal-Faliba waxaa loo Fududayn camalkiisa». Waxaa wariyay Muslim. Al-Layl (1-21).**

## Suurat Ad-Duxaa سورة الضحى

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَـٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Barqinka.

وَٱلضُّحَىٰ ﴿١﴾

2. Iyo Habeenku markuu xasilo (Madoobaado).

وَٱلَّيْلِ إِذَا سَجَىٰ ﴿٢﴾

3. Inaan Eebe kaa tagin Nabiyow kuuna cadhoonin.

مَا وَدَّعَكَ رَبُّكَ وَمَا قَلَىٰ ﴿٣﴾

4. Aakharana kaaga khayr badan Adduunka.

وَلَلْـَٔاخِرَةُ خَيْرٌ لَّكَ مِنَ ٱلْأُولَىٰ ﴿٤﴾

5. Eebaana ku siindoona (wanaag) waadna raalli noqon.

وَلَسَوْفَ يُعْطِيكَ رَبُّكَ فَتَرْضَىٰٓ ﴿٥﴾

6. Miyuusan ku helin Eebahaa Adigoo Agoon ah oosan ku dhawaynin.

أَلَمْ يَجِدْكَ يَتِيمًا فَـَٔاوَىٰ ﴿٦﴾

7. Miyuunase ku helin Adigoo baadi ah oosan ku hanuuninin.

وَوَجَدَكَ ضَآلًّا فَهَدَىٰ ﴿٧﴾